



## Shaqooyinka Riinjiga iyo Jilaasida

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

- ! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaanilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. ***Tilmaamahaan ku saabsan riinjiga iyo jilaasida ayaa naga caawinaysa nadiifinta marinadeena biyaha.***

### Riinjiyayn

- ▣ Aqoonso in ay riinjiga ku jirto iyo inkale sunta maarta\*.
- ▣ Ku shaqee gudaha aag xiran mar kast oo ay suuragalayso.
- ▣ Adeegso baafafka waxyaabaha dhibca iyo dharka dhibcaha qabta si aad ugu celiso waxa daata.
- ▣ Geli dhammaan agabka la xariira riinjiga meel daboolan iyo aag xiran.
- ▣ Qasacyada ku hay xaalad wanaagsan oo dabool marka aan la isticmaalayn.

### Nadaafada

- ▣ Qashinka kudar riinjiga wasaqda ah, maadooyinka qasma iyo jilciyaasha adoo ku ridaaya meelaha agabka khatarta badan.
- ▣ Nadiifi goobaha shaqada maalin kasta, ayna ku jirto inaad ka saarto dhammaan jababka riinjiga iyo busta. D Adeegso qaababka qalalan sida xaaqida, tirtirista, haawinta, iyo sifaynta.
- ▣ Biyaha ayaa keliya la adeegsan karaa haddii aysan wasaq ku jirin waana in loo daadshaa qaab waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka qabanaaya. Marka aad adeegsanayso qaababka nadiifinta qoyan, dabool marinnada biyaha daadka ee kuu dhow.
- ▣ Ku dhaq buraashyada riinjiga ama qalabka keliya marinka bulaacada wasaqda sida siinka oo marna haku dhaqin meel biyuhu ka dareerayaan sida meelaha la maro ama geeska wadada.

*\*Dusha meelaha la riinjiyeyay kahor 1978 ayaa lahaan kara riinji ka samaysan sunta maarta. Sharciga gobalka iyo qaar kamid ah xeerarka maxaliga ah ayaa maamula fujinta iyo qashin ku darista riinjiga ku salaysan sunta maarta. Waa masuuliyad ku saaran inaad go'aamiso in riinjigu ka kooban yahay sunta maarta, kahor intaadan meesha ka saarin aadan qashinka ku darin. La xariir Ismaamulka San Diego oo aad ka wacayso (858) 694-2888, kadibna la hadal Nadiifiyaha wasaqda warshadaha, si aad u waydiiso bixinta riinjiga ku salaysan maarta iyo qashin ku daristiisa.*

- ! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO). ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.***

**Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo [www.sandiegocounty.gov/stormwater](http://www.sandiegocounty.gov/stormwater) ee WPO.**

waan  
**difaaci karnaa**  
**marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayo keliya  
dhawr talaabo.

**waad ku**  
**mahadsan tahay**  
inaad doorkaaga ka  
qaadatay difaacida  
marinadeena biyaha.

